

Tani waa su'aal adiga kugu socota oo ku saabsan inaad u ogolaato in ilmahaagu uu ka qaybqaato daraasad cilmi-baadhis ah oo ay maamulayaan Jaamacadda Oslo (UiO) iyo Jaamacadda Koonfur-bari Norway (USN). Qoraalkan waxaan ku siineynaa macluumaad ku saabsan ujeedooyinka daraasadda iyo macnaha ay ka qaybqaadashadu u leedahay ilmahaaga.

Ujeedo

Annagu DIVA ahaan waxaannu u kuurgalaynaa sida fiidiyowga laga duubo cashar-bixinta ay samaynayaan ardayda baraynaysa macallinimada loo isticmaali karo si ardayda loo baro inay noqdaan macalimiin ka sii fiican sida hadda.

Daraasaddan cilmi-baadhistu qaabkan ayay u dhacaysaa: Ardayda baranaysa macallinimadu waxay cashar siinayaan fasalka iyagoo tababar ku jira. Cashar-bixinta waxaa laga duubayaa fiidyow iyadoo la isticmaalayo telefoonnada gacanta ama aybaadka ardayda. Duubista waxaa lagu samaynaa barnaamijka Visual Vocal Application (VIVA) oo loo sameeyay in lagu hubiyo in fiidyoyga la duubay iyo xogta loo maareeyo hab waafaqsan xeerarka Ilaalinta xogta qofka (GDPR). Sawirka fiidiyowga ah ee ilmahaagu ku jiro waxaa loo isticmaali doonaa casharo kooxeed oo digitaal ah oo ka dhacaya Jaamacadda Koonfur-bari Norway. Barayaasha macalinnimada iyo ardayda macalinnimada baranaysa ayaa ka wadahaadli doona cashar-bixinta fiidiyowga ku jirta, si ardayda macalinnimadu ay u sii baran karaan qaabka wanaagsan ee loo fulin karo cashar-bixinta.

Yaa mas'uul ka ah daraasadda cilmi-baadhista?

Dhinaca Jaamacadda Koonfur-bari Norway, waxa daraasadda ka masuul ah Machadka Waxbaridda oo ay Toril Aagaard ka tahay maamulaha daraasadda ee USN, Lene J. Kjær ayaa mas'uul ka ah tijaabinta lagu samaynayo waxbarashada macalinnimada dugsiyada hoose/dhexe ee USN islamarkaana Katrine Nesje ayaa ah maamulaha mashruuca ee dhanka UiO.

Waa maxay sababta lagu su'aalayo ka qaybgalka?

Waxaa lagu weydiinayaa ka qaybgalka sababtoo ah hal ama dhowr arday oo barta macalinnimada ayaa tababar ku qaata dugsiga ilmahaaga islamarkaana ka qaybqaadanaya mashruuca cilmi-baadhista ee DIVA.

Maxaa dhacaya haddii aad ka qaybqaadato?

1) Haddii aad doorato inaad ka qaybqaadato, waxaa fiidyow laga duubayaa qaybo ka mid ah cashar-bixinta ay ardayda macalinnimadu siinayaan fasalkaaga. Waxa la duubi doonaa qiyaas ahaan 45 daqiiqo. Fiidyowgu waxa uu caadi ahaan diiradda saarayaa cashar-bixinta ardayga macalinnimada, laakiin qaar ka mid ah wajiyada ardayda iyo codkooda ayaa sidoo kale ku jiri doona duubista. Ardayda macalinnimada waxaa la siiyay koorso ku saabsan maaraynta xogta, ilaalinta xogta qofka iyo akhlaaqda oo laga rabo inay ka gudbaan si loogu oggolaado in ay duubaan fasalka. Fiidiyowga waxaa loo keydin doonaa si elektaroonig ah oo waafaqsan tilmaamaha USN iyo shuruudaha GDPR-ka. Fiidiyowga loo isticmaalayo ujeedooyin cilmi-baadhis ah waxaa laga tirtirayaa wixi qofka lagu aqoonsan karo waxaana loo beddelaya qoraal.

2) Ardaydu waxay dooranayaan qayb ka mid ah fiidiyowga la duubay (sida caadiga ah 5 daqiiqo) oo lagu daawanayo cashar-bixin kooxeed oo digitaal ah oo ka dhacaysa ee Jaamacadda Koonfur-bari Norway. Halkan ayaa ardayda macalinnimada baranaysa, macalimiinta macalinnimada ee Jaamacadda Koonfur-Bari Norway iyo macalimiinta tababbarka qaatay eegi doonaan oo ka wadahaadli doonaan qaybaha fiidyowga. Sidoo kale cashar-bixinta kooxdan waa la duubi doonaa waxaana loo kayd in doonaa hab elektaroonig ah oo waafaqsan tilmaamaha USN iyo shuruudaha GDPR-ka. Fiidiyowga loo isticmaalayo ujeedooyin cilmi-baadhis ah waxaa laga tirtirayaa wixi qofka lagu aqoonsan karo waxaana loo beddelaya qoraal.

Ka qaybgalku qasab maaha

Ka qaybgalka daraasadu maaha qasab. Haddii aad doorato inaad ogolaato in ilmahaagu uu ka qaybqaato, waad ka bixi kartaa ogolaanshaha wakhti kasta adigoon wax sabab ah sheegin. Dhammaan macluumaadka ku saabsan ilmahaaga waxaa laga reebayaa wixii lagu aqoonsan karo. Wax cawaaqib xun ah ma kala kulmi doontid haddii aadan rabin inaad ka qaybqaadato ama aad mar dambe ka baxdo. Ardayda aan ka qaybqaadanin daraasadda cilmi-baadhista waxaa la fadhiisin doonaa meel aan kamaradu qabanaynin si aan wejigooda loo duubin. Haddii codadka ardaydan ay ku jiiraan duubista, waa laga goyn doonaa isla markiiba ka dib marka duubista la sameeyo, ka hor inta aan duubista loo dirin halka lagu kayd inayo. Haddii arday badani

doortaan inaysan ka qaybgalin, waxaa cashar-bixin lagu siin doonaa fasal kale.

Ilaalinta xogtaada— sida aan u kaydin doono oo aan u isticmaali doono xogtaada

Xogta ilmahaaga ku saabsan waxaanu kaliya u isticmaali doonaa ujeedooyinka lagu sharaxay qoraalkan. Waxaanu xogta u maarayn doonaa si qarsoodi ah islamarkaana fiidiyowga la duubay waxaa lagu kaydinnaa serfer amaan ah oo yaalla USN, si waafaqsan xeerarka ilaalinta xogta qofka (GDPR).

Kooxda mashruuca ee arki kara fiidiyowga laga duubay cashar-bixintii fasalka (fasalka ilmahaaga) iyo cashar-bixintii kooxeed ee digitaalka ahayd (waxbarashada macalinnimada):

- Cilmi-baadheyaal ka tirsan UiO iyo USN
- Saddex macalin oo ka socda dugsiga Hammer skole
- Shaqaalaha farsamada ee UiO iyo USN ee ka masuul ah kaydinta iyo tirtirista faylasha fiidiyowga iyo qofka qoraal ka dhigaya duubista loogu talagalay cilmi-baadhista.

Kuwan soo socda ayaa arki kara fiidiyowga laga duubay cashar-bixinta fasalka:

- Ardayda macalinnimada barata ee cashar-bixinta siisay fasalka ilmahaaga
- Macalinka caadiga ah ee fasalka (oo ah qofka haga ardayda jaamacadda)
- Barayaasha macallimiinta iyo ardayda macalinnimada ee ka qaybgalaya cashar-bixinta kooxda ee lagu daawanayo oo lagu gorfaynayo fiidiyowgii laga duubay fasalka ilmahaaga

Fiidiyowga waxaa la tusi karaa kooxo gaar ah oo isugu jira cilmi-baadheyaal ka tirsan ama aan ka tirsanayn UiO iyo USN si loo falanqeeyo oo loo hubiyo tayada natiijooyinka ka soo baxay cilmi-baadhista, iyo si kor loogu qaado aqoonta barayaasha cilmiga macalinnimada ee ka tirsan UiO iyo USN.

Kaliya maamulayaasha daraasadda iyo maamulka ayaa arki kara oggolaanshaha dadku bixiyeen iyo liiska magacyada.

Natiijooyinka ka soo baxa cilmi-baadhista waxaa lagu soo bandhigi doonaa goleyaal heer qaran iyo caalami ba ah (shirar, siminaaro, daabacaadyo ay khubarro hubiyeen). Dadka ka qaybala cilmi-baadhista ma lagu aqoonsan karo maqaallada la daabaco.

Barfasoor dhexe Toril Aagaard, ayaa ah maamulaha mashruuca qaybta laga fulinayo USN. Mashruuca waxaa hogaaminaya barfasoor dhexe Torunn Aanesland Strømme iyo barfasoor dhexe Katrine Nesje, oo ka tirsan UiO.

Maxaa laga yeelayaa macluumaadkaaga marka aannu dhammayno mashruuca cilmi-baadhista?

Mashruuca ayaa la qorsheeyey inuu dhammaado 31-ka Desembar 2028 waxaana markaas la tirtirayaa xogta oo ay ku jiraan fiidiyowga la duubay.

Xuquuqdaada

Markasta oo lagugu aqoonsan karo xogta la hayo, waxaad xaq u leedahay inaad:

- aragtid xogta qofeed ee kugu saabsan ee la diiwaangeliyay,
- in la saxo xogta qofeed ee adiga kugu saabsan,
- in la tirtiro xogta qofeed ee adiga kugu saabsan,
- in lagu siiyo nuqul ka mid ah xogtaada qofeed (in aad qaadan kartid xogta), iyo
- in aad ilaaliyaha xogta qofka ama Hay'adda Kormeerka Ilaalinta Xogta u gudbisid cabasho ku saabsan habka loo maareeyay xogtaada qofeed.

Maxaa noo oggolaaday in aannu maarayno xog qofeed ee adiga kugu saabsan?

Xogta adiga kugu saabsan waxannu isticmaalaynaa ka dib markaad noo oggolaatid.

Ka dib markii machadka Barida, USN uu ka codsaday ayay shirkadda Norsk senter for forskningsdata AS (NSD) qiimayn ay samaysay ka dib ay garatay in xogta qofka ee cilmi-baadhista loo isticmaali doono hab waafaqsan xeerarka ilaalinta xogta qofka.

Halkee ayaan ka heli karaa faahfaahin?

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan daraasadda, ama aad rabtid inaad ka faa'adaysatid xuquuqdaada, la soo xidhiidh: Maamulaha mashruuca ee USN oo laga helo e-booska toril.aagaard@usn.no ama NSD — Norsk senter for forskningsdata AS, oo laga helo e-boosta personverntjenester@nsd.no, ama telefoonka: 55 58 21 17; ama • Ilaaliyaha xogta qofka ee USN personvernombud@usn.no.

Salaan wacan

Toril Aagaard (Maamulaha mashruuca ee USN), Lene J. Kjær (Macalinka cilmiga macalinnimada, USN), Katrine Nesje (Maamulaha mashruuca, UiO)

Anigu waxaan oggolahay:

Waxaan helay oo aan fahmay macluumaad ku saabsan mashruuca DIVA ah, waxaana la i siiyey fursad aan ku weydiiyo su'aalaha aan qabo. Waxaan oggolahay in:

- ilmahayga laga duubi karo muqaal xilliga fasalka ee ardayga macalinnimadu wax barayo
- fiidiyowga la duubay waxaa loo isticmaali karaa ujeedooyin la xidhiidha cashar-bixin/tababar ka jira USN
- muuqaalka fiidiyowga waxaa loo isticmaali karaa ujeedooyin la xidhiidha cilmi-baadhis ka socota UiO iyo USN
- Fiidiyowga waxaa la tusi karaa kooxo gaar ah oo isugu jira cilmi-baadheyaal ka tirsan ama aan ka tirsanayn UiO iyo USN si loo falanqeeyo oo loo hubiyo tayada natiiyooyinka ka soo baxay cilmi-baadhista, iyo si kor loogu qaado aqoonta barayaasha cilmiga macalinnimada ee ka tirsan UiO iyo USN.

Haddii aan isu-talaab saaro “Ja, jeg samtykker” waxaa foomka oggolaanshaha la kaydin doonaa ilaa iyo inta mashruuca uu dhammaanayo.

Samtykke *

Dersom jeg krysser av for «Ja, jeg samtykker», vil dette samtykkeskjemaet bli lagret så lenge prosjektperioden pågår.

Jeg samtykker til at mine opplysninger lagres og behandles frem til prosjektet er avsluttet, 31. desember 2028.

☐ Ja, jeg samtykker

Waxaan oggolahay in macluumaadkeyga la kaydiyo oo la maareeyo ilaa marka mashruucu dhammaanayo, 31-ka Desembar 2028.